

Ku dhaqan Xafiis D.

FAAFINTA

الرسمية

OFFICIAL



RASMIGA AH

الجريدة

BULLETIN

EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

Sanadka 12aad

Muqdisho,

07 April 2025

Lr. 1

Waaxda Maamulka Faafinta Rasmiga ah

Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda

FAAFIN BIL SOO BAXA

Qiimaha waa \$XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA**: Sanaddii waa \$XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa \$XXX Dollar. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa \$XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

KOBNIIN

BOGGA KOOWAAD

SHARCI

W.M

BOGGA LABAAD

XEER


BOGGA SEDDEXAAD

TALOoyin, ISGAARSIIN, OGAYSIIIS, IWM

Bilaha

JAN - March

2025



SUMMAD/WBM/XW/ 020 /2025

Taariikh: 28 Maarso 2025

**XEER-NIDAAMIYAHA HALBEEGGA FAAFINTA XOGAHA HESHIISYADA
WAXSOOSAAR WADAAGGA AH Lr. 2**

Wasiirka Batroolka iyo Macdanta ee XFS

Markuu Arkay	Qodobka 102aad (1) ee Dastuurka Kummeelgaarka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
Markuu Arkay	Qodobka 31aad ee Dastuurka Kummeelgaarka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
Markuu Arkay	Qodobbada 42aad iyo 43aad ee Sharciga Batroolka ee tirsigiisu yahay 19 soona baxay 8dii Febraayo 2020
Markuu Arkay	Qodobka 45aad ee Sharciga Batroolka ee tirsigiisu yahay 19 soona baxay 8dii Febraayo 2020;
Markuu Arkay	Qodobbada 51aad(1) iyo 57aad ee Xeer-nidaamiyaha Nidaamka Xukuumadda
Markuu Tixgeliyay	Soojeedinta Hay'adda Batroolka Soomaaliya

WUXUU SOO SAARAY XEER-NIDAAMIYAHA SOO SOCDA:

QODOBKA 1AAD

**ANSIXINTA XEER-NIDAAMIYAHA HALBEEGGA FAAFINTA XOGAHA HESHIISYADA
WAXSOOSAAR WADAAGGA AH**

1. Wasiirka Batroolka iyo Kheyraadka Macdanta ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya wuxuu soo saaray ansixiyayna Xeer-nidaamiyaha Halbeegga Faafiinta Xogaha Heshiisyada Waxsoosaar Wadaagga ah ee ku lifaaqan Wareegtadan kaasi oo saaran yahay saxiixa gaaban ee Wasiirka dhinaca hoose ee midigta bog kasta.

2. Xeer-nidaamiyahani wuxuu dhaqangalayaa markuu saxiixo Wasiirka Batroolka iyo Kheyraadka Macdanta, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda Federaalka laguna daabacayaa mareegta rasmiga ah Wasaaradda Batroolka iyo Kheyraadka Macdanta.
3. Xeer-nidaamiyahani wuxuu keliya ku dhaqangalayaa Heshiisyada Waxsoosaar Wadaagga ee la galo kadib taariikhda la soo saaray Xeer-nidaamiyahani.
4. Xeer-nidaamiyahani waxaa lagu soo saaray laba nuqul oo ku kala dhigan afka Soomaaliga iyo Ingiriiska. Haddii ay iska hor yimaadaan labada nuqul; waxaa lagu dhaqmayaa oo sarraysnaya nuqulka ku dhigan af Soomaaliga.



Haali Mhamad

Mudane. Dahir Shire Maxamed
Wasiirka Batroolka iyo Kheyraadka Macdanta
Xukuumadda Federaalka Soomaaliya



**XEER-NIDAAMIYAHA HALBEEGGA FAAFINTA XOGAHA HESHIISYADA
WAXSOOSAAR WADAAGGA AH Lr. 2**

Qodobka 1aad: Magac iyo Ujeeddada Xeer-nidaamiyaha

1. Xeer-nidaamiyahani waxaa loogu yeerayaa Xeer-nidaamiyaha Halbeegyada Faafinta Heshiisyada Waxsoosaar Wadaagga ah.
2. Ujeeddada Xeer-nidaamiyahan ayaa ah kor u qaadista daahfurnaanta hawlgallada batroolka si shacbiga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ula socdaan uguna warhayaan hannaanka maaraynta khayraadka batroolka ee dalka.

Qodobka 2aad: Qeexid Ereyo

Ereyada soo socda waxay yeelanayaan qeexitaannada ku hareer qoran haddii aysan ka hor imaanayn Sharciga Batroolka:

- | | |
|---|---|
| 1. Oggolaansho | Waxaa loola jeedaa Heshiis Wax Soosaar Wadaag ah oo ay wadagaleen Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo Qandaraasle si uu uga fuliyo geyiga Soomaaliya hawlgallada sahmintu, qodista iyo soo saarista batroolka. |
| 2. Qandaraasle | Waxaa loola jeedaa qandaraaslaha lala galay heshiiska waxsoosaar wadaag ah; |
| 3. Faafinta Xogaha Heshiisyada Batroolka | Waxaa loola jeedaa shaacinta iyo faafinta:
<ol style="list-style-type: none">a. sababaha bixinta iyo gelidda Heshiis Waxsoosaar Wadaag ah;b. Xogaha ku faahfaahsan Qodobka 3aad ee Xeer-nidaamiyahan; iyoc. Xogaha ku faahfaahsan Qodobka 4aad ee Xeer-nidaamiyahan. |
| 4. Faafinta Rasmiga ah | Waxaa loola jeedaa Faafinta Rasmiga ee Dowladda ee uu u xilsaaran yahay Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda; |

5. **Hababka kala duwan ee Faafinta Xogaha** Waxaa loola jeedaa faafin qoraal ah, muuqaal iyo maqal ah lana xiriira xogaha Heshiisyada Waxsoosaar Wadaagga ah.

Qodobka 3aad: Faafinta Sababaha loo galay Heshiis Waxsoosaar Wadaag ah iyo xogaha ku saabsan Qandaraaslaha

Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed waxay ku faafinaysaa muddo 30 maalin gudahood Faafinta Rasmiga ee Dowladda iyo Hababka Shaacinta ee kala duwan xogaha soo socda:

- a. Sababaha gelidda heshiis waxsoosaar wadaag ah ha noqdo mid lagu bixiyay tartan furan ama wadaxaajood toos ah;
- b. Xogaha ku saabsan Qandaraaslaha oo ay ka mid yihiin, balse aan ku koobnayn:
 - i. Magaca iyo xarunta Qandaraaslaha iyo goobta ay ka diiwaangashan tahay;
 - ii. Faahfaahin ku saabsan sooyaalka xirfadnimo iyo waaya-aragnimo ee Qandaraaslaha lana xiriirta fulinta hawlgallada batroolka ee Heshiiska Waxsoosaar Wadaaggu khuseeyo;
 - iii. Faahfaahin ku saabsan xirmooyinka Batrool oo uu Heshiiska Waxsoosaar wadaaggu khusayso iyo goobaha laga fulinayso hawlgallada batroolka ee Heshiiska Waxsoosaar Wadaaggu khuseeyo; iyo
 - iv. Awoodda dhaqaale iyo midda farsamo ee Qandaraaslaha lana xiriirta fulinta hawlgallada batroolka ee Heshiiska Waxsoosaar Wadaaggu khuseeyo.


Qodobka 4aad: Xogaha Heshiiska Waxsoosaar Wadaagga ee la faafinayo

1. Iyadoo la dhowrayo Qodobka 18(2) iyo 19aad(9) ee Sharciga Batroolka, Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed waxay ku faafinaysaa Faafinta Rasmiga ee Dowladda iyo Hababka Shaacinta ee kala duwan muddo 30 maalin gudahood oo ka billaabmaysa taariikhda la galo heshiis waxsoosaar wadaag ah xogaha hoos ku cad:
 - a. Faahfaahinta xirmada ama aagga qandaraaska lagu bixiyay
 - b. Billawga heshiiska iyo muddada uu jirayo;
 - c. Muddada lagula heshiyyay Qandaraaslaha inuu ku fuliyo sahminta iyo baarista batroolka;
 - d. Faahfaahin la xiriirta qodobbada ilaalinta degaanka;
 - e. Faahfaahin la xiriirta gunnooyinka, kirada dhulka, kharashaadka tababbarka iyo kharashaadka loogu talaggalay bulshada degaanka oo ay tahay inuu Qandaraasluhu bixiyo;
 - f. Faahfaahin la xiriirta caddadka xuquuqda lahaanshaha ee mudnaanta leh oo ay tahay inuu Qandaraasluhu bixiyo;

- g. Faahfaahin la xiriirta caddadka kharash-celinta iyo wadaagga faa'iidada batroolka iyadoo lagu caddaynayo hannaanka qaybsiga faa'iidada batroolka iyo saamiga ay kala leeyihiin Dowladda iyo Qandaraaslaha;
 - h. Caddadka saamiga oo ay ku yeelanayso Shirkadda Batroolka Soomaaliya heshiiska waxsoosaar wadaagga iyo habka ay ku qaadanayso si ku sheeggan qodobka 35aad ee Sharciga Batroolka;
 - i. Faahfaahin la xiriirta caddadka canshuurta macaashka, canshuurta la goynayo lacagaha uu bixiyo qandaraaslaha (withholding tax), canshuurta wareejinta xuquuqda heshiiseed ee batroolka ee ku waajibta Qandaraaslaha;
 - j. Faahfaahin la xiriirta canshuur-dhaaf loo sameeyay Qandaraaslaha;
 - k. Faahfaahin ku saabsan qodobbada Xasillnaanshiyaha shuruudaha dhaqaalaha ee Heshiiska Waxsoosaar Wadaagga;
 - l. Faahfaahin la xiriirta waajibyada maaliyadeed ee aan lagu sheegin Qodobkan balse ku cad Heshiiska Waxsoosaar Wadaagga ah;
 - m. Faahfaahin ku saabsan hannaanka xisaabaadka iyo hantidhowriddooda ee heshiiska; iyo
 - n. Sharciga lagu dhaqayo heshiiska.
2. Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed waxay kaloo shaacinaysaa tallaabooyinka khuseysa wax ka baddelida xogaha ku cad Qodobka 3aad iyo Qodobka 4(1) lana xiriira Heshiiska Waxsoosaar Wadaagga muddo 30 maalin gudahood oo ka billaabmaysa taariikhda la sameeyay wax ka baddelkaasi iyadoo lagu daabacayo Faafinta Rasmiga ee Dowladda iyo Hababka kala duwan ee Faafinta Xogaha.

Qodobka 5aad: Helloonaanshiyaha Xogaha la faafiyay

Wasaaradda Batroolka iyo Kheyraadka Macdanta iyo Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed waa in ay si joogta ah u xaqiijiyaan in dhammaan xogaha la faafiyay si waafaqsan Xeer-nidaamiyahan kuwaas oo ku dhigan afka Soomaaliga ahaadaan kuwa ay dadweynuhu uga heli karaan si billaash mareegta rasmiga ee Wasaaradda Batroolka iyo Macdanta Kheyraadka iyo Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed muddada uu dhaqangal yahay Heshiiska Waxsoosaar Wadaagg oo ay xogaha la faafiyay khuseeyaan.



Federal Government of the Somali Republic
Ministry of Petroleum & Mineral Resources
Office of the Minister

Ref: MoPMR/OM/ 020 /2025

Date: 28th March 2025

**SUBJECT: ISSUANCE AND APPROVAL OF THE REGULATION GOVERNING THE
PUBLICATION STANDARDS OF PRODUCTION SHARING
AGREEMENTS NO. 2**

**The Minister of Petroleum and Mineral Resources of the Federal Government of
Somalia:**

- Having Seen:** Article 102 (1) of the Provisional Constitution of the Federal Republic of Somalia;
- Having Seen:** Article 32 of the Provisional Constitution of the Federal Republic of Somalia;
- Having Seen:** Articles 42, 43 and 44 of the Somali Petroleum Law (Law N. 19 of 8th February 2020);
- Having Seen:** Article 45 of the Somali Petroleum Law (Law N. 19 of 8th February 2020);
- Having Seen:** Articles 51(1) and 57(1) of the Regulation on the Organisation of the Government, 2025;
- Having Considered:** The advice and recommendations from the Somali Petroleum Authority;

Hereby issues the following Decree


**ARTICLE 1
ISSUANCE AND APPROVAL OF REGULATION GOVERNING THE
PUBLICATION STANDARDS OF PRODUCTION SHARING AGREEMENTS**

1. The Regulation governing the Publication standards of Production Sharing Agreement, attached to this Ministerial Decree and bearing the Minister's initials on right side bottom of each page, is hereby issued and approved.
2. This regulation shall enter into force upon the signature of the Minister of Petroleum and Mineral Resources of Federal Government of Somalia and shall be published on the official bulletin of the Federal Republic of Somalia and the official website of the Ministry of Petroleum and Mineral Resources.

3. This Regulation shall only apply to Production Sharing Agreements executed after the date of issuance of this Regulation.
4. This Regulation is issued in Somali and English languages. In the event of any discrepancy, inconsistency or conflict between the Somali and English text of this Regulation, the Somali text shall prevail and be the governing and binding text.



H.E. Dahir Shire Mohamed
Minister of Petroleum and Mineral Resources
Federal Government of Somalia



REGULATION GOVERNING THE PUBLICATION STANDARDS OF PRODUCTION SHARING AGREEMENTS NO. 2

Article 1 Name and Purpose of the Regulation

1. This Regulation shall be cited as the Regulation governing the Publication standards of Production Sharing Agreements.
2. The purpose of this Regulation is to promote transparency in petroleum operations, ensuring that the people of the Federal Republic of Somalia are well-informed about the management of the country's petroleum resources.

Article 2 Definition of Terms

The terms listed below shall have the meanings assigned to them, unless otherwise specified in the Somali Petroleum Law:

1. **Authorization** Means an authorization granted by the Government, specifically in the form of a Production Sharing Agreement (PSA), which allows the holder to engage in petroleum exploration, development, and production activities within the jurisdiction of the Federal Republic of Somalia;
2. **Contractor** Means the entity that has entered into a Production Sharing Agreement (PSA) with the Federal Government of Somalia.
3. **Publication** means the public disclosure and dissemination of information regarding:
 - a. the reasons for granting PSA;
 - b. description of the information provided in article 3 of this regulation
 - c. description of the information outlined in article 4 of this regulation.
4. **Official Bulletin** Means the Official Bulletin of the Federal Government of Somalia, issued and maintained by the State Attorney General of the Federal Government of Somalia, which contains official information on the activities of the Federal Government and is made digitally accessible to the public free of charge; and

5. **Forms of Publication:** means the publication, disclosure and dissemination of information required under this regulation in written, audio, or video formats, whether in printed or digital form.

Article 3

Disclosure of the information concerning the Contractor

The Somali Petroleum Authority shall, within thirty (30) days, publish in the Official Bulletin and other Forms of Publication the following information:

- a. The reason for granting License whether it is granted through competitive form or direct negotiations;
- b. Information concerning:
 - i. The name, headquarter and registered address of the Contractor;
 - ii. A description of the Contractor's professional skills and expertise related to petroleum exploration, development, or production;
 - iii. The geographical location in Somalia where the Contractor is conducting petroleum operations, including the names of specific regions and blocks involved in exploration, development, or production;
 - iv. The financial and technical capability of the Contractor in conducting petroleum operations;

Article 4

Information to be Published Regarding Production Sharing Agreements

1. Subject to the provisions of Articles 18(2) and 19(9) of the Somali Petroleum Law, the Somali Petroleum Authority shall, within thirty (30) days from the execution of a Production Sharing Agreement (PSA), publish a summary in the Official Bulletin and other Forms of Publication containing the following details concerning the executed PSA:
 - a. Detail of the block granted under the PSA;
 - b. the term and duration of the PSA;
 - c. the duration of the whole exploration period;
 - d. provisions on safeguarding and protection of the environment;
 - e. A description of the bonuses, surface rental fees, training fund, and contribution to the local communities fund required from the Contractor to pay under the PSA;
 - f. A description of the royalty rate required from the Contractor to pay under the PSA;
 - g. A description of the rate of the Cost Recovery, Profit Petroleum sharing mechanism, including the applicable R-Factor tranches and the Federal Government's and Contractor's share of Profit Petroleum;
 - h. A description of the state participation interest in accordance with the Article 35 of the Petroleum Law;
 - i. A description of the Corporate Income Tax, Withholding tax and Capital gains Tax required from the Contractor to pay under the PSA;

- j. A description of the types of Tax Exemptions granted to the Contractor;
 - k. A description of the fiscal stability provisions established in the PSA;
 - l. A description of any other financial obligations not specified in this Article but is required from the Contractor to pay them under the PSA;
 - m. A description of the accounting and auditing procedures under the PSA; and
 - n. Governing Law.
2. Within thirty (30) days of any amendment to a signed Production Sharing Agreement (PSA) that affects the information outlined in Article 3 and Article 4(1), the Somali Petroleum Authority shall publish a description of such amendment in the Official Bulletin and other Forms of Publication.

Article 5

Availability and Accessibility of Published Information

The Ministry of Petroleum and Mineral Resources and the Somali Petroleum Authority shall ensure that all information published in accordance with the provisions of this Regulation is readily accessible to the public in Somali, free of charge, on the official websites of both the Somali Petroleum Authority and the Ministry of Petroleum and Mineral Resources for the entire duration of the PSA.